

Kugu socota adigaaga laga tallaali doono

Gawracato, teetano iyo xiiqdheer

Gawracato, teetano, iyo xiiqdheer waa seddax cudur oo khatar ah, laakin tallaalka ayaa kaa ilaalinaya. Haddii uusan tallaal jirin dad badan ayey cudurradani ku dhici lahaayeen.

Gawracato waa infekshin dhuunta ku dhaca. Cudurku wuxuu qofka gaarsiin karaa dhaawac aad u culus oo ah xagga wadnaha, kilyaha iyo nidaamka neerfayaasha, waana loo dhiman karaa xitaa cudurka. Cudurku wuxuu dadka kale kula faafi karaa dhareerka, tusaale ahaan haddii caagad biyo la wadaago ama aad leesugu dhawaado.

Teetanada waxaa keena bakteeriyo jirka ka geli karta tusaale ahaan dhaawac wasakh ah ama qaniinyo bahal. Teetanadu waxay sababta muruqroor, waana wax nolosha khatar ku ah. Cudurka dadka isma qaadsiyyaan.

Xiiqdheertu waxay sababta qufac dheer oo xoog leh oo lama filaan ah. Cudurka aad buu khatar ugu sii yahay carruurta yar-yar, noloshooda ayeyna xiiqdheertu khatar gelin kartaa. Waxaa cudurkan dadka kale lagu qaadsiin karaa dhibcaha yar-yar ee ka soo baxaya qofka buka marka uu qufacu ama hindhisu.

Waxaa loo baahanyahay dhawr khiyaas

Fasalka 8 ama 9 ayaa laysku siiyaa kхиyaasta shanaad ee tallaallada ka dhanka ah teetanada, gawracatada, iyo xiiqdheerta. Dadka waaweyn waxay u baahanyihii in ay 20:ki sanaba mar is tallaalaan si uu difaacoodu u sii jiryo.

Dhammaan tallaallada aad ka qaadaneysid laamaha caafimaadka carruurta iyo caafimaadka ardaydu maaha kuwo khasab ah waana lacag la'aan.

Ma dooneysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato?

Haddii aad su'aalo qabtid waxaa mar kastaba lagugu soo dhaweynayaa inaad la xiriirto xaruntaada caafimaadka carruurta (BVC) ama qeybta caafimaadka ardayda ee iskuulka.



Folkhälsomyndigheten

SIDAN AYUU TALLAALKU U DHACAYAA

Tallaalka kahor

Haddii aad qabtid su'aalo ku aaddan tallaalka waxaad la hadli kartaa qof weyn oo qoyskaaga ka mid ah ama kalkaalisada caafimaadka iskuulka. Haddii aad rabtid waxaad sidoo kale booqashada u soo wadan kartaa qof qaangaar ah.

Tallaalka

Kalkaalso caafimaad ayaa tallaalka ku siineysa. Waxaa laga tallaalaaya cududda.

Tallaalka kadib

Dadka badankoodu waxba ma dareemaan tallaalka kadib ama waxaa keliya yara damqata meeshi cirbadda looga muday. Qaarna waxaa qaban karta qandho iyo murqaha gacmaha oo xanuuna. Gebi ahaanba waa wax aan khatar ahayn oo dhawr maalin gudohood iska dhammaanaya. Haddii aad wax uun ka welweshid tallaalka kadib waxaad adigu ama waalidkaa la xiriiri kartaan kalkaalisadaada caafimaadka iskuulkama laamaha caafimaadka.

BARNAAMIJKA TALLAALKA EE ISWIIDHAN

Halkan waxaad ka aqrisan kartaa tallaalada lagu casuumo dhammaan carruurta ku nool dalka Iswiidhan si looga hortago cudurada khatarta ah.

XARUNTA CAAFIMAADKA CARRUURTA

Qaybta 1, 2 iyo 3: Cudurka cumaha ku dhaca, Teetanada, Xiiq dheerta, cudurka dabaysha, bakteeriyada sababta xanuunka dhegħha, cagaarshow B, cudurka sababta xanuun ku dhaca xubnha laga neefsado

Qaybta 1 iyo 2: Faayraska sababta u ah calool xanuunka

Qaybta 3: Faayraska shubanka xun



6 toddobaad
3 billood
5 billood

12 billood

Qaybta 1: Jadeeco, cudurka sababta xanuunka daamanka oo barara, faayraska sababo cudur jirka u yeella finan yar yar

18 billood

Qaybta 4: Cudurka cumaha ku dhaca, teetano, xiiq dheer, cudurka dabaysha

5 jir

ISKOOLKA

Qaybta 2: Jadeeco, cudurka daamanka oo barara, jadeeco jarmalka

Fasalka 1-2

Qaybta 1 iyo 2: Faayraska HPV

Fasalka 5

Qaybta 5: Cudurka cumaha ku dhaca, teetano, xiiq dheerta

Fasalka 8-9